



Juxa iyo dameerihiisii





Juxa iyo dameerihiisii

Buugga 11^{aad}

Fasalka 2^{aad}




Buuggan waxaa maalgaliyay hay'ada USAID Wuxaana isla diyaariiyay PACT ETHIOPIA iyo xafiiska waxabarashada DDSI. Wuxaana dib u habayn iyo daabacaad ku sameeyay hay'ada Save the children iyo wasaarada wax barashada heer federal

2008 T.I.



The CC By license lets others distribute, adjust, and build upon this work, for free or commercially, as long as credit is given to the original creation. However, any changes from the original must be indicated.


For more info please refer: <https://creativecommons.org/licenses/>




Maalin maalmaha ka mida
ah ayaa Juxa loo dhiibay
dameero oo la yidhi soo
waraabi waxay ahaayeen
toban (10) dameerood.




markuu ceelkii ka soo
noqday ayuu is yidhi
dameerihii tiri isagoo
saaran mid ka mid ah
dameerihii.




Markii uu tiriay ayay
noqdeen sagaal (9)
dameerood sababtoo ah
wuxuu ka tagay tuu
korka ka fuushanaa.




Intuu yaabay oo ka
degay dameerkuu dusha
uu ka fuushanaa ayuu
tiradii dib ugu ceshay
waxaana usoo baxay
toban (10) dameerood
markaasuu yidhi




markaan dameerka dusha
ka fuulo dameer baa
la waayaa markaan ka
degana dameerkii baa
soo noqonaya oo tiradii
waa ay dhanaanaysaa.



markaa wuxuu
go'aansaday inuu lugihiiisa
isticmaalo ilaa intuu
gurigii ka geynayo iyagoo
dhan oo tobankii (10kii)
dameer oo ah tiradii
saaka loo soo dhiibay.



markuu gurigii tegay oo
uu dameerihii xereeyey
buu reerkii u sheegay
sheekadii ku dhacday cidna
waxba kama soo qaadin
oo waxaa la yidhri war
waa Juxee inaga daaya.



Markii ay habeen badhkii
ahayd buu xasuustay
in uu ka iloobay tirada
dameerkuu korka ka
fuushanaa oo markuu

dameerka ka degana
ku tirinayay marka uu
fuushan yahayna uu ka
iloobayay dameerka uu
fuushanaa.

